

## GOLAHA DEEGAANKA BRISTOL

**(WADDOOYIN KALA DUWAN, ST. GEORGE AREA, LAWRENCE HILL, EASTON, ST. GEORGE CENTRAL, ST. GEORGE TROOPERS HILL AND ST. GEORGE WEST WARDS, MAGAALADA BRISTOL ) (MAMNUUCIDA BAABUUR KU WADASHADA) (DARIIQ HAL-DHINAC)**  
**(MAMNUUCIDA JOOGSASHADA) (GOOBO BAABUURTA LAGU RARO) (GOOBO BASASKU DHIGTAAN)**  
**(GOOBAHA BAARKINKA DADKA NAAFADA AH) (GOOBAHA BAARKINKA BAABUURTA WADAAGA AH)**  
**AMARKA 202-**

Golaha Degaanka ee Bristol (halkan ka dib loogu yeedhi doono "Golaha") iyagoo adeegsanaya awoodahooda ku xusan qaybaha 1(1), 2(1) illaa (3), 4(2), 32(1) iyo 35(1) ee Qaybta IV ee Jadwalka 9aad ee Xeerka Xakamaynta Isku-socodka Gaadiidka Wadooyinka 1984 qaybtiisa wax laga beddelay (halkan ka dib loogu yeedhi doono "Sharciga 1984") iyo dhammaan awoodaha kale ee ay leeyihiin, ka dib markii ay la tashadeen taliyaha ciidamada booliska taas oo waafaqsan Qaybta III ee Jadwalka 9aad ee Xeerka 1984, ayay halkan ku soo gudbinayaan amarkan soo socda:

### **QAYBTA I** **DHAQANGALKA, MAGACA IYO FASIRAADA**

---

#### Dhaqangalka iyo magaca

1. Amarkani wuxu dhaqangalayaa ##### waxana loogu yeedhi amarka Golaha Deegaanka Magaalada Bristol (Waddooyin kala duwan, St. George Area, Lawrence Hill, Easton, St. George Central, St. George Troopers Hill and St. George West Wards, ee Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Mamnuucida Joogsashada) (Goobaha Rar Qaadista) (Goobaha Dhigashada Baska) (Goobaha Dadka Naafada ah Baabuurta Dhigtaan) (Goobaha Baabuurta Wadaaga ah la Dhigo) Amarka 202-.

#### Fasiraad

2. (1) Amarkan:-

“**Darajo tagsi la ogolaaday**” waxa loola jeedaa meel kasta oo laamiga ah oo ka kooban looguna muujiyey jaantuska calaamadaynta waddada 1028.2 sida lagu sheegay shayga 5 ee shaxda calaamadaha ee Qaybta 4 ee Jadwalka 7 ee Shuruudka Calaamadaha Waddooyinka iyo Tilmaamaha Guud ee 2016, sida loo beddelay;

“**Baakin la oggol yahay**” waxaa loola jeedaa meel kasta oo ku taalla jidka taas oo loo ogol yahay in baabuurta la dhigto ama loo asteeyay in sidaas loo isticmaalo si waafaqsan Xeerka 1984;

“**Baakin la oggol yahay**” waxaa loola jeedaa gaadhi kasta oo amar loogu ogoladay inuu isticmaalo goobaha baarkinka laga ogol yahay ama loo asteeyay inuu sidaas sameeyo si waafaqsan Xeerka 1984;

" **bas**" waxa uu leeyahay macno la mid ah ka ku qoran Jadwalka 1 ee Xeerarka Calaamadaha Waddooyinka iyo Tilmaamaha Guud 2016, sida loo beddelay;

**"Goobta Baarkinka Baska"** waxa loola jeedaa goob ka mid ah laamiga oo Qodobka 28aad ee amarkani u ogolaaday in basasku dhigan karaan;

**"Jidka basaska oo keli ah istaagi karaan"** markay la xidhiidho qayb ama dhinac waddo waxa loola jeedaa dhammaan goobaha laamiga ah oo ka kooban looguna muujiyey jaantuska calaamadaynta waddada 1025.1 sida lagu sheegay shayga 9 ee shaxda calaamadaha ee Qaybta 4 ee Jadwalka 7 ee Shuruucda Calaamadaha Waddooyinka iyo Tilmaamaha Guud ee 2016, sida loo beddelay;

**"Naadi baabuureed"** Macnaheedu waa naadiga baabuurta magaalada ama urur la mid ah (ay ku jiraan qof kasta ama hay'ad kasta oo ku sita magaca naadiga ama ururka) oo Golahu qoraal ah ugu ogolaaday ujeedooyinka amarkan;

**"Goobta Baarkinka Baabuurta Naadiyada"** waxa loola jeedaa aag ku yaal jidka oo Qodobka 67aad ee amarkani u asteeyay in la dhigto baabuurta naadiyada

**"Gaadiidka Naadiga Baabuurwadaaga"** waxa loola jeedaa gaadhi nooca uu Golahu ansixiyay ah oo uu Naadiga Baabuurta ama Golahu bixiyay si loogu isticmaalo dadka bixiyay lacagaha xubinimadii ama khidmad kale ee Naadiyada Baabuurta oo iyadoo isla markaas la sii ballansanyo ama horey boos loo qabsanayo muddo cayiman la isticmaalo markaas oo qofku muujinayo aqoonsiga uu siiyay ooo/ama uu bixiyay Golahu;

**"waddo laami ah"** waxaa loola jeedaa dariiq ka kooban laami wayn kaas oo ah dhabbo dadku u isticmaali karaan inay baabuurta ku wataan (aan ahayn waddiiqada baaskilada);

**"Sarkaal taraafii madani ah"** wuxuu leeyahay macnaha ku qoroan qaybta 76 ee Xeerka Maareynta Isku-socodka Gaadiidka ee 2004;

**"keenista"** iyo **"qaadis"** la xidhiidha alaab kasta waxa ka mid ah in la hubiyo ujeedada alaabta loo keenay ama loo qaaday;

**"qof naafo ah"** waxaa loola jeedaa qof naafo ah oo leh dadka naafada ah ee lagu sheegay Xeerarka Dadka Naafada ah 2000 (Aqoonsiyada Baabuurta (England), sida wax laga beddelay;

**"aqoonsiga qofka naafada ah"** wuxuu leeyahay macno la mid ah midka ku qoran Xeer-nidaamiyaha Dadka Naafada ah (Aqoonsiyada Baabuurta) (Ingiriiska) ee 2000, qaybtiisa wax laga beddelay;

**"Goobta Baarkinka Dadka Naafadaha ah"** waxa loola jeedaa goob ka mid ah laamiga oo Qodobka 46aad ama Qodobka 47aad ee amarkani ogolaansho siiyay;

**"Gaariga qofka naafada ah"** waxaa loola jeedaa:

- (a) Gaadhi si sharci ah ugu muujinaya calaamada qofka naafada ah meesha ku habboon kaas oo isla markaas ama waxyar ka dib ama ka hor muddada sugitaanka ee amarkani jideeyay uu watay qof naafo ah, ama haddii kale lagu siday qof ama dad naafo ah oo rakaab ah; ama
- (b) gaari curyaanka lagu sheegay Qaybta 136 ee Xeerka 1984;

“**Darawal**” marka loo eegayo baabuur cid ku sugaya meesha rarida, baakinka basaska la dhigto, baakinka dadka naafada ah ama goobta baakinka baabuurta naadiyada, waxa loola jeedaa waa qofka masuulka ka ah gaadhiga wakhtiga loogu tagey mmeesha rarida, baakinka basaska la dhigto, baakinka dadka naafada ah ama goobta baakinka baabuurta naadiyada, oo marka qof kale gaariga la maamulayo darawalka, fasiraadda kelmadda “**darawal**” waxaa isna soo gelaya qofkaas kale ee la maamulayo wadista;

“**qalab isgaarsiinta elektaroonika h**” waxa loola jeedaa qalab ka kooban ama la rabo inuu ka koobnaado shebekad isgaarsiineed elektaroonik sida ku qeexan Xeerka Isgaarsiinta 2003;

"**Sharci dejin**" waxaa loola jeedaa sharci kasta ha ahaado mid guud ama mid maxalli ah oo ay ku jiraan amar, xeerhoosaad, xeer nidaamiye, qorsh sharciyeed, nidaam ama xeer kale oo ku dhaqangalaya marka la mariyo habka sharci dejinta.

"**alaabo**" waxaa loola jeedaa alaabo nooc kasta oo ay tahay ha noqoto mid nool ama aan noolayn waxana ka mid ah baakadaha boostada oo nooc walba leh;

"**Gaadiidka alaabta**" waxaa loola jeedaa baabuur loo dhisay ama loo habeeyey si loogu isticmaalo qaadista alaabta ama rar kasta sifada uu doono ha lahaadee, ama rimoor alaabqaadis loo sanceeyay;

"**Tagaasida dadwaynaha**" waxay la macno tahay sida ku qoran qaybta 38 ee Xeerka Qodobbada Booliska Magaalada ee 1847 laakiin waa inay u hogaansan yihiin shuruudaha maamulka shatibixinta ee khuseeya calaamadaha dusha kaga qormaya tagsiga;

"**Baabuurta Dadka Naafadaha**" waxaa loola jeedaa:-

- (i) waxa loola jeeda gaadhi qof naafo ah wato ama gaadhi curyaan;
- (ii) Gaadhi soo bandhiga rukhsadda dhaafidda baakinka oo uu Golahu siiyay dhakhtar, kalkaaliso degmo, umuliso, ama qof kale oo caafimaad ahaan ama xirfad ahaan ugu qalma si ay u isticmaalaan markay xaalad degdeg ahi jirto, oo ay ku xiran yihiin shuruudo ama xayiraado uu saaray Golaha isticmaalkeeda; ama
- (iii) baabuur taariko diblumaasiyadeed wata oo gudanaya waajibaadkiisa rasmiga ah;

"**gaadhi curyaan**" wuxuu leeyahay macnaha la mid ah ka ku qoran qaybta 136 ee Xeerka 1984;

"**Goobta Rarida**" waxa loola jeedaa goob ka mid ah laamiga oo Qodobka 10aad ama Qodobka 11aad ee amarkani u ogolaaday in wax lagu raro;

“**adeegga maxalliga ah**” wuxu leeyahay macno la mid ah midka ku qoran ee Xeerka Gaadiidka 1985;

"**mooto**" iyo “**mooto dhugdugley**” wuxuu leeyahay macno la mid ah ka ku qoran qaybta 136 ee Xeerka 1984;

“**Saacadda Baarkinka**” wuxuu leeyahay macno la mid ah sida ku qoran Awaamiirta Gaadiidka ee Maamulka Deegaanka (Dhaafitaanada Dadka Naafada ah) (England) (Xeerarka) 2000;

“**Gaari rakaab**” waxa loola jeedaa baabuur (marka laga reebo baaskiil ama gaadhi curyaan) loo dhisay kaliya qaadista rakaabka iyo xamaamadooda loona habeeyey inuu qaado wax aan ka badneyn siddeed rakaab ah oo aanu ku jirin darawalka iyo sidoo kale waa in gaadhigu aanu rimoor jiidayn;

"**qorshe**" waxaa loola jeedaa sawirrada ama khariiradaha ku lifaaqan halkaan sida ku cad Jadwalka ku lifaaqan amarkan;

“**saarkaal bulsheed booliska kaaba**” wuxuu leeyahay macno la mid ah midka ku qoran qaybta 38 ee Xeerka Wax-ka-baddalka Booliska 2002;

“**baakad boosto**” waxay leedahay macno la mid ah midka ku qoran Xeerka Adeegyada Boostada 2000;

“**bixinta adeegga boostada ee caalamiga ah**” waxay leedahay macno la mid ah midka ku qoran Xeerka Adeegyada Boostada 2000;

"**aqoonsiga ku habboon**" waxaa loola jeedaa calaamad ama hab kale oo cid lagu aqoonsan karo oo uu oo uu soo saaray iyo/ama ansixiyay Golaha taas oo muujinaysa in gaariga calaamadda sita uu leeyahay Naadi Baabuur lana dhigan karo baarkinka Baabuurta Naadiga;

“**Booska ku habboon**” wuxuu leeyahay macno la mid ah sida ku qoran Awaamiirta Gaadiidka ee Maamulka Deegaanka (Dhaafitaanada Dadka Naafada ah) (England) Xeerarka 2000;

"**summad taraafiko**" waxay leedahay macne la mid ah ka ku qoran qaybta 64 ee Xeerka 1984;

“**adeeg bixinta caalamiga ah**” waxay leedahay macno la mid ah midka ku qoran Xeerka Adeegyada Boostada 2000; iyo

“**Gaadhi**” waxaa loola jeedaa baabuur kasta, ha ahaado mid ku habboon in loo isticmaalo waddada ama yaanu noqone, oo ay ku jiraan wax kasta oo la jiidayo ah ama buudhi ah, leh ama aan lahayn taayir, oo u muuqda inuu gaadhigaas qayb ka yahay, iyo wixii rar ah oo lagu qaado iyo wax kasta oo ku xiran gaadhigaas laga hadlayo.

- (2) Sharci kasta oo lagu dhex xuso amarkan waa in loo fahirto sharcigaas oo isku dhan iyadoo la tixgeliyo wax ka baddal, dhaqangelin, midayn, dib u gudbin kasta oo sharciga lagu sameeyay ama iyadoo la fiirinayo saameynta sharciyada kale ee sharciga laga hadlayo gadaashiis la gudbiyay.

## **QAYBTA II** **SUGITAANKA BAABUURTA**

Mamnuucida iyo Xakamaynta Sugitaanka Baabuurta

3. Marka laga reebo sida ku cad Qodobka 7aad iyo Qodobka 8aad ee amarkan qofna, marka laga reebo isagoo qofkaas ogolaansho ama amar ka haysta sarkaalka boolis ah oo labbisan ama saraakiisha bulshada ee booliska kaaba, waa inaanu istaajin gaadhi ama u ogolaann in qof kale joojiyo gaadhi qaybaha waddada ama hareerahooda qorshaha loogu calaamadiyay **Wax laguma sugi karo marna**
4. Marka laga reebo sida ku cad qodobka 7 iyo qodobka 8 ee amarkan qofna, marka laga reebo qof haysta awaamiirta ama ogolaanshaha sarkaalka fulinta madaniga ah, askari boolis ah oo ku lebis dirayska ama sarkaalka taageerada bulshada, cid kuma sugi karo ama uma ogolaano in qofkale ku sugo saacadaha u dhexeeya 8:00 subaxnimo iyo 6:00 galabnimo ee maalin kasta marka laga tago Axadda qayb kast oo ka mid ah iyo weli hareeraha waddada qorshaha loogu calaamadiyay **Sugitaan Ma Jiro Isniin-Sabti 8 subaxnimo - 6 galabnimo.**
5. Marka laga reebo sida ku cad qodobka 7 iyo qodobka 8 ee amarkan qofna, marka laga reebo qof haysta awaamiirta ama ogolaanshaha sarkaalka fulinta madaniga ah, askari boolis ah oo ku lebis dirayska ama sarkaalka taageerada bulshada, cid kuma sugi karo ama uma ogolaano in qofkale ku sugo saacadaha u dhexeeya 8:00 subaxnimo iyo 6:00 galabnimo ee maalin kasta marka laga tago Axadda qayb kast oo ka mid ah iyo weli hareeraha waddada qorshaha loogu calaamadiyay **Sugitaan Ma Jiro Isniin-Sabti 8 subaxnimo - 6 galabnimo 1 saac dhigo oo ha soo laaban ka hor 1 saac oo kale:-**
  - (i) muddo ka badan hal saac; ama
  - (ii) haddii muddo ka yar hal saac ay ka soo wareegtay xilligii baakinka hore dhammaaday inta lagu jiro saacadaha la sheegay ee muddada u dambaysay ee sugitaanka (haddii ay jirto) baabuurkaas looma ogola inuu baakinto qaybtaas waddada ama hareeraheeda.

#### Mamnuucidda joogsashada Baabuurta

6. Marka laga reebo sida ku cad qodobka 9 ee amarkan qofna, marka laga reebo qof haysta awaamiirta ama ogolaanshaha sarkaalka fulinta madaniga ah, askari boolis ah oo ku lebis dirayska ama sarkaalka taageerada bulshada, ma joogsan karo ama kuma nasan karo ama uma ogolaano in qofkale ku nasto saacadaha u dhexeeya 8:00 subaxnimo iyo 6:00 galabnimo ee maalin kasta marka laga tago maalmaha Sabtida ama Axadda qayb kast oo ka mid ah iyo weli hareeraha waddada qorshaha loogu calaamadiyay **Lama Istaagi Karo irridaha Isniin-Jimce 8 subaxnimo - 6 galabnimo.**

#### Ka dhaafitaano

7. (1) Ma jiraan wax ku qoran Qodobka 3aad ama Qodobka 4aad ama Qodobka 5aad oo qofna sharciyan ka hor istaagaya inuu gaarigiisu cid ku sugo ama u ogolaado in baabuur kale ku sugo qaybaha waddada kor lagu soo xusay ama hareeraheeda bi shardi hadii qodobbadaasi ay lagamamaarmaan u yihiin:
  - (a) in qof gaari ka soo fuulayo ama ka degeyo;
  - (b) ujeedo gaariga u gaar ah, taas oo aan laga heli karayn waddo kale oo aan tan ahay, taas oo la xiriiri hawlahaan soo socda, ee kala ah:-
    - (i) halgalada dhismaha, warshadaha, duminta ama qodaalka;

- (ii) saarista wax kasta oo xannibaya isku socodka gaadiidka;
  - (iii) dayactirka, hagaajinta ama dib u dhiska ka socda qaybta waddada la xusaay ama hareeraha waddadaas;
  - (iv) dhigista, taagista, wax ka badalista ama dayactirka ka dhex socda ama laga wado dhulka ku xiga qaybta waddada ee la xusay ama hareeraheeda kuwaas oo lagu wado bullaacadaha ama xadhkaha, tuubooyinka ama qalabka loogu talagalay bixinta gaasta, biyaha ama koronta ama qalabyada elektaroonika ah ee loogu talagalay isgaarsiinta sida ku cad xeerka Isgaarsiinta 2003; ama
  - (v) dhismaha, rakibidda, hagaajinta, dayactirka, horumarinta ama nadiifinta wixi calaamadaha waddada ah, kaabayaasha istaanka basaska ama qalabyada kale ee loogu talagalay dariiqa ama shaygii kale ee sifo sharci ah qaybta waddada ama hareeraheeda loogu rakibay ama loogu rakibayo;
- (c) gaariga loo adeegsanayo hawlaha dowladda hoose, Hay'adda Deegaanka, shaqaalaha biyaha ama bullaacadaha oo qabsanaya waajibkooda sharciyeed, haddii aan hawlahaas si fiican loogu qaban karayn wax waddo ah oo kale; ama
  - (d) gaadhiga loo adeegsado bixinta adeega boostada dadwaynaha ee loogu talagalay inuu geeyo baqshadaha boostada oo wata waajibaadkiisa adeega boostada;
  - (e) gaari doonaya inuu baatrool, naafto ama biyo ama naqas ka qaato geerash kasta oo ku yaalla ama ku dheggan qaybta waddada ee laga hadlayo ama hareeraheeda;
  - (f) gaari cid ku sugaya goob ama meel u dhow goob ku taalla ama ku dheggan qaybta waddada laga hadlayo ama hareeraheeda illaa iyo inta sugitaankaasi uu is macquul ah lagama maarmaan ugu yahay tacsii ama aroos meesha ka socda; ama
  - (g) Gaariga loo adeegsado adeega dabdamiska iyo samatabixinta, ambalaasta ama hawlo booliis -

Waxaase shardi ah in ka dhaafida farqadani ee la xidhiidha isticmaalka ku qeexan farqadaha (e) iyo (f) aan halkan lagu dabaqi karin si looga dhaafo baabuur kasta mamnuucida lagu sheegay Qodobada la xusay ilaa iyo inta ay khusaysa haddii ay ku tacaluqaan qaybaha waddada ama hareeraheeda ee ay qorshaha ugu qoran tahay **marnaba wax rar laguma rari/dejin karo**.

- (2) Ma jiro wax ku xusan qodobka 3-aad ama qodobka 4-aad ama qodobka 5-aad ee amarkan oo ka dhigaya wax sharci-darro ah in qof gaariga joojiyo ama u ogolaado qof kale inuu istaago qaybaha ama hareeraha waddooyinka lagu soo sheegay Qodobadaas haddii ay lagama maarmaan tahay in gaarigu meesha alaabo ka qaad ama ku rogo -

Waxaase shardi ah in ka dhaafida farqadan aan halkan lagu dabaqi karin si looga dhaafo baabuur kasta mamnuucida lagu sheegay Qodobada la xusay ilaa iyo inta ay khusaysa haddii ay ku tacaluqaan qaybaha waddada ama hareeraheeda ee ay qorshaha ugu qoran

tahay **marnaba wax rar laguma rari/dejin karo.**

- (3) Ma jiro wax ku xusan qodobka 3-aad ama qodobka 4-aad ama qodobka 5-aad ee amarkan in gaari ku sugo ama loo ogolaado inuu ku sugo haddii:-
- (a) gaarigu yahay mid ogolaansho haysta, oo wax ku sugaya goob baakin loo ogol yahay;
  - (b) uu yahay tagasi, oo cid ku sugaya goobta tagaasida loo ogol yahay; ama
  - (c) gaariga loo isticmaalayo bixinta adeegyada maamulka maxalliga ah ee lagu baxsho istaanada basaska  
sida ku cad Qaybta 6 ee Jadwalka 7 ee ku lifaaqan Calaamadaha Waddooyinka iyo Shuruucda iyo Tilmaamaha Guud ee Gaadiidka 2016, sida wax looga beddelay.

8. (1) Ma jiraan wax ku qoran Qodobka 3aad ama Qodobka 4aad oo qofna sharciyan ka hor istaagaya inuu

gaadhi wata calaamada qofka naafada ah iyo saacadda waqtiga baakinka cabbirta (kaas oo darawalka ama qof kale oo gaadhiga ka masuul ah ku muujiyay waqtiga sugitaanku bilaabmay) istaago oo wax ku sugo qayb kasta oo ka mid ah waddooyinka halkaas lagu xusay ah ama hareerahooda muddo aan ka badnayn saddex saacadood (iyadoo loo baahan yahay inay muddooyinka sugitaanka ee isla gaadhigani istaagayo isla goobtii isla maalintaas hore la rabo inay u dhexayso ugu yaraan hal saacad).

- (2) Ma jiro wax ku xusan qodobka 5aad ee amarkan oo ka dhigaya sharci darro in qof wata aqoonsiga dadka naafada ah oo ku muujiyay halkii loo baahnaa uu istaago ama u ogolaado in qofkale oo naafo ah istaago qaybaha waddooyinka ama hareerahooda ee waddooyinka lagu xusay Qodobaadaas -

Waxaase shardi ah in aan gaadhiga qof naafada ah marnaba loo ogolaan inuu istaago qaybaha waddooyinka ama hareerahooda kuwaas o qorshuhu ku calaamadiyay **marnaba rar laguma rari/rogi karo.**

9. Ma jiro wax ku xusan qodobka 6-aad ee amarkan oo ka dhigaya wax sharci-darro ah in qof gaariga joojiyo ama u ogolaado qof kale inuu ku negaado qaybaha ama hareeraha waddooyinka lagu soo sheegay halkaas haddii ay lagama maarmaan u tahay:-

- (a) ujeedo gaariga u gaar ah, taas oo aan laga heli karayn waddo kale oo aan tan ahay, taas oo la xiriiri hawlahaan soo socda, ee kala ah:-
  - (i) dayactirka, hagaajinta ama dib u dhiska ka socda qaybta waddada la xusaay ama hareeraha waddadaas;
  - (ii) dhigista, taagista, wax ka badalista ama dayactirka ka dhex socda ama laga wado dhulka ku xiga qaybta waddada ee la xusay ama hareeraha kuwaas oo lagu wado bullaacadaha ama xadhkaha, tuubooyinka ama qalabka loogu talagalay bixinta gaasta, biyaha ama koronta ama qalabyada elektaroonika ah ee loogu talagalay isgaarsiinta sida ku cad xeerka Isgaarsiinta 2003; ama
  - (iii) dhismaha, rakibidda, hagaajinta, dayactirka, horumarinta ama nadiifinta wixii

calaamadaha waddada ah, kaabayaasha istaanka basaska ama qalabyada kale ee loogu talagalay dariiqa ama shaygii kale ee sifo sharci ah qaybta waddada ama hareeraheeda loogu rakibay ama loogu rakibayo;

- (b) gaariga loo adeegsanayo hawlaha dowladda hoose, Hay'adda Deegaanka, shaqaalaha biyaha ama bullaacadaha oo qabsanaya waajibkooda sharciyeed, haddii aan hawlahaas si fiican loogu qaban karayn wax waddo ah oo kale; ama
- (c) gaari doonaya inuu baatroot, naafto ama biyo ama naqas ka qaato geerash kasta oo ku yaalla ama ku dheggan qaybta waddada ee laga hadlayo ama hareeraheeda;
- (d) gaari cid ku sugaya goob ama meel u dhow goob ku taalla ama ku dheggan qaybta waddada laga hadlayo ama hareeraheeda illaa iyo inta sugitaankaasi uu is macquul ah lagama maarmaan ugu yahay tacsii meesha ka socda; ama
- (e) Gaariga loo adeegsado adeega dabdamiska iyo samatabixinta, ambalaasta ama hawlo booliis.

### **QAYBTA III** **GOOBAHA RARISTA**

---

#### **Oggolaanshaha iyo Isticmaalka Goobaha Rarista**

- 10. Aag kasta oo ka mid ah laamiga oo qorshayaashu ku calaamadiyeen **Raris keliya** (haddii aan si kale loogu tilmaamin isla qorsheyaasha dhexdooda, hal dhinac uu ka soo celinayo geftinka laamiga) waxa hadda ka dib loo adeegsan doonaa goob rariseed ahaan, iyadoo loo eegayo qodobadan soo socda ee amarkan.
- 11. Aag kasta oo ka mid ah laamiga oo qorshayaashu ku calaamadiyeen **Raris keliya Isniin - Jimce 7 subaxnimo - 5 galabnimo** (haddii aan si kale loogu tilmaamin isla qorsheyaasha dhexdooda, hal dhinac uu ka soo celinayo geftinka laamiga) waxa hadda ka dib saacadaha u dhexeeya 7.00 subaxnimo iyo 5.00 galabnimo ee maalin kasta marka laga reebo Sabtida iyo Axadda, iyadoo loo eegayo qodobadan soo socda ee amarkan, loo adeegsan doonaa goob rariseed.

#### **Baabuurta Goobaha Rarista loo Ogolaaday**

- 12. Goob kasta oo rariseed waxa loo isticmaalayaa, iyadoo la raacayo qodobada amarkan, in baabuurta sidda rarka iyo rakaabku dhigtaa iyadoo ujeedadu tahay:-
  - (a) dejin iyo raris joogto ah ama muddo soconaysa; ama
  - (b) soo celinta ama qaadashada alaabo horey looga gatay meel goobta rarista ka ag dhow alaabadaas oo aanay macquul ahay in gacanta lagu geeyo waxaase shardi ah in rasiidhkii alaabada lagu gatay qofku hayo.
- 13. Xadka goob kasta oo rariseed oo laamiga ku taalla waa inay muujiyaan caalamadaha waddooyinka ee ku habboon.

#### **Habka Istaagista Goob Rariseed**



14. Darawalka gaadhiga istaagaya goob rariseed waa inuu u istaago:-
- (a) waddada qaab saf keliya ah oo la siman geftinka laamiga iyadoo masaafada u dhexaysa dacalka laamiga iyo taayirka xiga dhanka laamiga ee gaariga waxaan ka badnayn 300 millimitir; iyo
  - (b) qaab qayb kasta oo ka mid ah gaadhiga guud ahaan uu ku gudo jiro hal goob rariseed oo keliya.

#### Xaddaadaha Isticmaalka ee Baabuurta Taagan Goobta Rarista

15. Darawalka baabuurka isticmaalaya goobta rarista waa inuu damiyo mishiinka isla marka uu gaadhigu soo galo goobta rarista oo aanu daarin mishiinka illaa isaga oo gaadhiga booska rarista ka beddelaya, ama ka tegaya goobta rarista maahane.
16. Darawalka baabuurka taagan goobta raristu waa in aanu yeedhin hoon ama wax la mid ah marka laga yimaado isaga oo gaadhiga booska rarista ka beddelaya, ama ka tegaya goobta rarista maahane.
17. Qofna looma ogola inuu iibiyo ama isku dayo inuu beeciyo wax badeeco ah isagoo ku jira gaadhi ku baakiman goob rariseed isagoo ka iibinaya qof jooga ama u dhow goobta rarista ama inuu iibiyo ama soo bandhigo adeegyo ama xirfado uu damacsana yahay inuu gado ama iib u soo bandhigo.
18. Qofna looma ogola inuu gaadhi ku baakiman goob rariseed ka qabto wax shaqo dayactir ah ama hagaajin ah ama inuu dhaqo gaadhiga marka laga reebo hawlaha dayactirka ee loo baahan yahay si gaadhiga looga dhaqaajiyo goobta rarista.

#### Xaddaadaha Wax Ku Sugista Goobta Rarista

19. Marka laga reebo sida ku xusan qodobka 20-aad ee amarkan, qofna waa inuusan ka tagin baabuur taagan goob rariseed:-
- (a) illaa iyadoo gaadhigu u baakiman yahay qaab waafaqsan shuruucda ku xusan Qodobka 12aad ee amarkan; iyo
  - (b) isagoo taagan boos aan ahay ka lagu cayimay Qodob 14aad ee amarkan.

#### Xaddaadaha Baabuurta Wax Ku Sugay Goobta Rarista

20. (1) Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobka hore ee amarkan ee ku saabsan baabuurta lagaga tago goob rariseed iyagoo waafaqsan shuruucdaas, gaari kasta wuxu istaagi karaa meel kasta oo ka mid ah laamiga oo ku guda jirta goob rariseed (aan ka ahayn goobaha ama qaybaha rarista ama qaybahooda isticmaalkooda la joojiyay) haddii:-
- (a) gaarigu taagnanayo muddo aan ka badnayn labada daqiiqo, ama waqti intaas ka badan oo uu ogolaaday sarkaal fulineed madani ah, boolis labbisan ama sarkaal bulsheed booliska caawinaya, si qof u soo fuulo ama uga dego gaadhiga ama u soo saarto shandadihiisa ama ugala dego -

Haddii qofka laga hadlayo uu qabo naafonimo ama dhaawac si weyn u naafeeyay awoodiisa socodka ama uu qofku indhoole yahay, gaadhigu wuxu taagnaan karo intii loo baahdo si qofku u soo fuulo ama uga dego gaadhiga ama u soo saarto shandadihiisa ama ugala dego;

- (b) gaadhigu wuxu taagnaanaya muddada lagama maarmaanka u ah in qofku soo fuulo ama ka dego gaariga;
- (c) gaarigu wuxu taagnaanayaa haddii darawalka ay caqabada ka baxsan awoodiisu ka hor istaagto inuu dhaqaaqo ama uu isu taago si uu isaga ilaaliyo shil;
- (d) gaariga loo isticmaalayo adeeg dabdamis ama samatabbixineed, ambalaas ama hawlo boolis ama uu yahay gaari (aan ahay gaari rakaab) ay isticmaalayaan shaqaalaha dowladda hoose oo gudanaya waajibaadkooda sharciyeed;
- (e) gaadhigu u taagnaanayo muddada ku filan oo lagamamaarmaan u ah saaritaanka wax xannibaya isku-socodka baabuurta;
- (f) uu yahaya gaadhiga ay adeegsanayaan shaqaalaha boostada dadwaynaha oo ku jira shaqadooda adeega boosta ee ay ku geynayaan ama kaga soo uruurinayaa baqshadaha boostada goobaha ku dheggaan goobta rarista ama inay baqshadaha geeyaan ama ka soo qaadaan sanduuqyada boostada ee ku dheggaan goobta rarista;
- (g) gaadhigu u taagan yahay muddo macquul ah oo lagama maarmaan u ah in dayactirka, rakibista ama saarista calaamad waddo, dhisme ama qalab dariiq oo ku dheggaan goobta rarista; ama
- (h) gaadhigu uu taagan yahay keliya muddada macquulka ah ee lagama maarmaanka u ah in loo adeegsado dhejinta ama jarista shay xayaysiin ah oo boostaro ah, nadiifinta dhuumaha qiiga ama daaqadaha, ee dhismayaash ku dheggaan goobta rarista ee gaadhigu wax ku sugayo.

(2) Xeerarka kor lagu sheegay waa inaan loo fasirran inay fasaxayaan wax ku xad-gudbaya xeerarka lagu sheegay ama ka sii dhalanaya Qaybta 25 ee Xeerka 1984.

#### Hab Joogsiga Baabuurta Laga Dhaafay Xannibaadda Goobaha Rarista

21. Qof gaadhi istaajinaya ama u ogolaanaya inuu qof kale sugitaan ku sameeyo goob rariseed si waafaqsan shuruucda ku xusan farqad-hoosaadka (f), (g) iyo (h) ee farqadda (1) ee Qodobka la soo dhaafay waa inuu hubiyaa in dhererka caqaayadda gaarigu la sinaado dacalka laamiga iyo in masaafada u dhexeysa dacalka laamiga iyo taayirka ugu xiga dhanka laamiga aanay ka badnaan saddex boqol oo millimitir.

#### Awoodaha Lagu Hakinayo Istickmaalka Goobaha Rarista

22. (1) Qof kasta oo Goluhu si guud ama si khaas ah ugu ogolaaday inay isticmaalaan goob rariseed waxay awood u leeyihiin inay joojiyaan isticmaalka goobta rarista, ama qayb kasta oo ka mid ah markasta oo ay aaminsan yihiin in joojinta isticmaalkaasi lagamamaarmaan yahay:-

- (a) iyadoo looga dan leeyahay kala socodsiinta saxmadda baabuurta ama horumarinta badqabkooda;
  - (b) ujeedada fududayn hawl dhisme, warshadeed, dumin ama qoditaan ka socota goobta rarista ama meelaha ku dheggan;
  - (c) ujeedada dayactirka, horumarinta ama dib u dhiska goobta rarista;
  - (d) ujeedada dhigista, taagista, wax ka badalista ama dayactir ka dhex socda ama laga wado dhulka ku xiga goobta rarista kuwaas oo lagu wado bullaacadaha ama xadhkaha, tuubooyinka ama qalabka loogu talagalay bixinta gaasta, biyaha ama koronta ama qalabyada elektaroonika ah ee loogu talagalay isgaarsiinta;
  - (e) ujeedada dayactirka, rakibista ama saarista calaamad waddo, dhisme ama qalab dariiq oo ku dheggan goobta rarista;
  - (f) si dadka deggan dhismayaasha ku hareeraysan goobta rarista markasta loogu fududeeyo hawlaha saarista alaabada guriga ama wixii la halmaala ee la gelinayo ama laga soo saarayo dhismayaasha ku hareeraysan goobta rarista;
  - (g) xilli kasta oo sabab saxmad abuuraysa darteed ay macquul tahay in jidku xirmo ama xannibmo; ama
  - (h) si dadka deggan dhismayaasha ku hareeraysan goobta rarista loogu fududeeyo xilliyada ay jiraan aroosyada ama tacsida, ama munaasabad kale oo khaas ah.
- (2) Aska booliis ah oo ku labbisan dirays ama sarkaalka taageerada bulshada ayaa si ku meel gaadh ah u joojin kara isticmaalka goobta rarista, ama qayb ka mid ah, illaa 7 maalmood haddii ay aaminsan yihiin inay lagama maarmaan tahay in lagaga hortago ama lagu fududeeyo saxmadda waddooyinka, ciriiriga, ama khataraha la xidhiidha gaadiidka durufo aan caadi ahayn awgood.
- (3) Qof kasta oo hakinaya ama amraya in la joojiyo isticmaalka goobta rarista si waafaqsan shuruucda ku xusan farqadaha (1) ama (2) ee Qodobkani waa inuu isla markaas goobta rarista sudhaa ama dhigaa calaamad waddo muujinaysa in isticmaalka goobtan rarista la joojiyay ama calaamad waddo muujinaysa in istaagista goobtan rarista la mamnuucay.
- (4) Ka-dhaafitaanka inta lagu jiro hakinta goobaha rarista

Qofna waa inaanu gaadhi dhigan ama u ogolaan qof kale inuu dhigto qayb kasta oo ka mid ah goob rariseed xilliyada calaamad waddo ay goobta rarista taallo (taas oo muujinaysa in isticmaalka goobta rarista la hakiyay) ama muddada goobta ama meel ku dheggan qayb goobta rarista ah ay taallo caalamad waddo (muujinaysa in isticmaalka goobta rarista la hakiyay) oo loo dhigay si waafaqsan farqada (3) ee Qodobkan -

Haddii aanay jirin wax qodobkan ku jira oo sharci darro ka dhigaya in la istaajiyo ama loo ogolaado inuu istaago gaadhi loo isticmaalo:-

- (a) adeega dabdamiska iyo samatabixinta, ambalaasta ama hawlo booliis.
- (b) gaarigu wuxu taagnaanayaa haddii darawalka ay caqabada ka baxsan awoodiisu

ka hor istaagto inuu dhaqaaqo ama uu isu taago si uu isaga ilaaliyo shil;

- (c) gaadhigu u taagnaayo muddada ku filan oo lagamamaarmaan u ah saaritaanka wax xannibaya isku-socodka baabuurta -

ama haddii gaadhiga goobta lagaga tago iyadoo ogolaansho laga haysto qofka isticmaalka goobta u hakiyay si waafaqsan farqadda (1) ee Qodobkan, ama qof kale oo uu ogolaansho buuxa siiyay.

#### Beddelista Booska Gaari Ku Jira Goobaha Rarista

23. Haddii gaari uu istaago goob rariseed ka hor imanaysa Qodobka 14 ama Qodobka 21 ee amarkan sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya ayaa beddeli kara ama amri kara in la beddelo goobta gaarigu taagan yahay si loogu hogaansamo shuruucda la soo xusay.

#### Kasaarida Baabuurta Goobaha Rarista iyo Si Badbaado Leh u Hayntooda

24. Haddii gaadhi (marka laga reebo mid aan dhaqaaqi karayn) looga tago goobta rarista si ku xadgudbaysa qodobada Qaybta III ee amarkan, sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya ayaa gaadhiga goobta ka qaadi kara ama soo agaasimi kara in laga qaado goobta rarista, oo haddii tani dhacdonna waa inuu qaaditaankan u saameeyaa hab badbaado leh una hayaa gaadhiga si badqabta.

#### Qaababka Gaadhi Looga Saarayo Goobaha Rarista

25. Sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya kaas oo si waafaqsan Qodobka 24 amarkan gaadhi u saaraya wuxu gaadhiga u saari karaa isagoo jiidaya ama kaxaynaya, ama qaabkii kale ee uu ka qaadi waayay inay lagamamaarmaan tahay, oo wuxu awood u leeyahay inuu ficiladaas ku sameeyo gaadhiga si uu u sameeyo saarista la soo sheegay.

#### Dhaqdhaqaaqa Baabuurta ku jira Goobaha Rarista Xilliyada ay Jiraan Xaalado Degdeg ah

26. Qof kasta oo si guud ama si khaas ah oo ugu ogolaadeen Golaha, sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya wuxu gaadhi lagaga tegay goobta rarista u dhaqaajin karaa ama amri karaa in loo dhaqaajiyo meesha uu u arko inay ku habboon tahay.

#### Dhigista Calaadaha Waddooyinka iwm.

27. Goluhu waa inuu:-

- (a) dhigaa oo ku ilaaliyaa agagaarka goobta rarista calaamado waddo iyo ama summadaha kale ee dariiqyada oo yeelan kara cabbir, midab iyo nooc kasta oo ay dejisay Waaxda Gaadiidka taas oo muujinaysa in goobtan rarista loo isticmaali karo in lagaga tago keliya baabuurta lagu cayimay Qodobka 12 ee amarka; iyo
- (b) qabto hawlaha kale ee looga baahan yahay si hufan u adeegsiga goobaha raritaanka.

**QAYBTA IV**  
**GOOBAHA BAARKINKA BASASKA**

**Oggolaanshaha iyo Isticmaalka Goobaha Baarkinka Basaska**

28. Aag kasta oo ka mid ah laamiga oo qorshayaashu ku calaamadiyeen **Basaska oo keliya 20 daqiiqo laguma soo laaban karo ka hor 1 saacad** (haddii aan si kale loogu tilmaamin isla qorsheyaasha dhexdooda, hal dhinac uu ka soo celinayo geftinka laamiga) waxa hadda ka dib loo adeegsan doonaa goob baarkin bas, iyadoo loo eegayo qodobadan soo socda ee amarkan.
29. Darawalka baska isticmaalaya goobta baarkinka baska waa in aanu u ogolaan gaadhiga in uu taagnaado goobta baska in ka badan 20 daqiiqo.
30. Looma ogola gaadhi bas ah inuu dib isu soo istaag goob baarkin bas markale illaa ay ka soo wareegayso hal saacad muddadii uu ka tegay goobta baarkinka baska.
31. Xadka goob kasta oo baarkin bas ah oo laamiga ku taalla waa inay muujisaa caalamadaha waddooyinka ee ku habboon.

**Habka Istaagista Goobta Baarkinka Baska**

32. Darawalka gaadhiga istaagaya goob baarkin bas waa inuu u istaago:-
  - (a) haddii qodobbo gaar ah jiraan  
haddii bas yaallo goob baarkin bas oo leh qodobo habjoogsi bas oo gaar ah oo lagu muujiyay calaamadaha waddada ku yaalla oo ku habboon, waa in basku goobtaas u taagnaado qaab waafaqsan shuruucdaas;
  - (b) haddii aanay jirin qodobbo gaar ah  
  
haddii aanay jirin wax qodobo ah oo goobta baarkinka baska u gaar ah waa inuu u istaagaa waddada qaab saf keliya ah oo la siman geftinka laamiga iyadoo masaafada u dhexaysa dacalka laamiga iyo taayirka baska ee xiga dhanka laamiga ee gaariga waxaan ka badnayn saddex boqol oo millimitir; iyo
  - (c) qaab qayb kasta oo ka mid ah baska guud ahaan ay ku gudo jirto hal baarkin bas oo keliya.

**Xaddidaada Isticmaalka Basaska ee Goobaha Baarkinka Baska**

33. Darawalka baska isticmaalaya goobta baarkinka baska waa inuu damiyo mishiinka baska isla marka uu basku soo galo goobta baarkinka baska oo aanu darin mishiinka illaa isaga oo baska baarkinka ka beddelaya, ama ka tegaya baarkinka baska maahane.
34. Darawalka baska taagan goobta baarkinka baska waa in aanu yeedhin hoon ama wax la mid ah marka laga yimaado isaga oo baska baarkinka ka beddelaya, ama ka tegaya baarkinka baska maahane.
35. Qofna looma ogola inuu iibiyo ama isku dayo inuu beeciyo wax badeeco ah isagoo ku jira bas ku baakiman goob baarkin bas isagoo ka iibinaya qof jooga ama u dhow goobta baarkinka baska ama inuu iibiyo ama soo bandhigo adeegyo ama xirfado uu damacsana yahay inuu gado ama iib

u soo bandhigo.

36. Qofna looma ogola inuu bas ku baakiman goob baarkin bas ka qabto wax shaqo dayactir ah ama hagaajin ah ama inuu dhaqo baska marka laga reebo hawlaha dayactirka ee loo baahan yahay si baska looga dhaqaajiyo goobta baarkin baska.

Xaddidaadaha Wax Ku Sugista Goobta Baarkinka Baska

37. Marka laga reebo sida ku xusan qodobka 38-aad ee amarkan, qofna waa inuusan ka tagin gaadhi taagan goob baarkin bas:-

- (a) illaa isagoo gaadhigu bas ah maahane; iyo
- (b) isagoo taagan boos aan ahay ka lagu cayimay Qodob 32aad ee amarkan.

Xannibaadaha in Baabuur aan ahayn Bas ay ku Istaagaan Goobaha Baarkinka Basaska

38. (1) Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobada hore ee amarkan ee ku saabsan bas lagaga tago goob baarkin bas isagoo waafaqsan shuruucdaas, gaari kasta oo kale oo aan ahayn bas wuxu istaagi karaa meel kasta oo ka mid ah laamiga oo ku guda jirta goob baarkin bas (aan ka ahayn goobaha ama qaybaha baarkinka basaska ee isticmaalkooda la joojiyay) haddii:-

- (a) gaadhigu wuxu taagnanaya muddada lagama maarmaanka u ah in qofku soo fuulo ama ka dego gaariga;
- (b) gaarigu wuxu taagnanayaa haddii darawalka ay caqabada ka baxsan awoodiisu ka hor istaagto inuu dhaqaaqo ama uu isu taago si uu isaga ilaaliyo shil;
- (c) gaariga loo isticmaalayo adeeg dabdamis ama samatabbixineed, ambalaas ama hawlo boolis ama uu yahay gaari (aan ahay gaari rakaab) ay isticmaalayaan shaqaalaha dowladda hoose oo gudanaya waajibaadkooda sharciyeed;
- (d) gaadhigu u taagnanayo muddada ku filan oo lagamamaarmaan u ah saaritaanka wax xannibaya isku-socodka baabuurta;
- (e) uu yahay gaadhi ay adeegsanayaan shaqaalaha boostada dadwaynaha oo ku jira shaqadooda adeega boosta ee ay ku geynayaan ama kaga soo uruurinayaa baqshadaha boostada goobaha ku dheggaan goobta baarkinka basaska ama inay baqshadaha geeyaan ama ka soo qaadaan sanduuqyada boostada ee ku dheggaan goob baarkin bas;
- (f) gaadhigu u taagan yahay muddo macquul ah oo lagama maarmaan u ah in dayactirka, rakibista ama saarista calaamad waddo, ama qalab dariiq oo ku dheggaan goobta baarkin baska; ama
- (g) gaadhigu uu taagan yahay keliya muddada macquulka ah ee lagama maarmaanka u ah in loo adeegsado dhejinta ama jarista shay xayaysiin ah oo boostaro ah, nadiifinta dhuumaha qiiqa ama daaqadaha, ee dhismayaash ku dheggaan goobta baarkinka baska ee gaadhigu wax ku sugayo.

- (2) Xeerarka kor lagu sheegay waa inaan loo fasirran inay fasaxayaan wax ku xad-gudbaya xeerarka lagu sheegay ama ka sii dhalanaya Qaybta 25 ee Xeerka 1984.

#### Hab Joogsiga Baabuurta Laga Dhaafay Xannibaadda Goobaha Baarkinka Basaska

39. Qof bas istaajinaya ama u ogolaanaya inuu qof kale sugitaan ku sameeyo goob baarkin bas si waafaqsan shuruucda ku xusan farqad-hoosaadka (f), (g) iyo (h) ee farqadda (1) ee Qodobka la soo dhaafay waa inuu hubiyaa:-
- (a) haddii bas yaallo goob baarkin bas oo leh qodobo habjoogsi baabuur oo gaar ah oo lagu muujiyay calaamadaha waddada ku yaalla oo ku habboon, waa in gaadhigu goobtaas u taagnaado qaab waafaqsan habka baabuurta halkaas isu taagaan;
- (i) illaa iyadoo dhererka gaadhigu ogolaan waayo inuu u hogaansamo farqad hoosaadkan maahane, waa in gaadhiga isu taago si waafaqsan shuruucda la soo xusay iyadoo qayb kasta oo gaadhiga ka mid ah ku guda jirayso goobta baarkinka baska; am
- (ii) haddii dhererka gaadhigu uu ogolaan waayo u hogaansanka farqad-hoosaadka hore, waa in dhererka caqaayadda gaarigu la sinaado dacalka laamiga iyo in masaafada u dhexeysa dacalka laamiga iyo taayirka ugu xiga dhanka laamiga aanay ka badnaan saddex boqol oo millimitir; iyo
- (b) haddii goobtu tahay goob kasta oo kale oo bas dhigto, waa in dhererka caqaayadda gaarigu la sinaado dacalka laamiga iyo in masaafada u dhexeysa dacalka laamiga iyo taayirka ugu xiga dhanka laamiga aanay ka badnaan saddex boqol oo millimitir.

#### Awoodaha Lagu Hakinayo Isticmaalka Goobaha Baarkinka Basaska

40. (1) Qof kasta oo Goluhu si guud ama si khaas ah ugu ogolaaday inay isticmaalaan goob rariseed waxay awood u leeyihiin inay joojiyaan isticmaalka goob kasta oo baarkin bas ah, ama qayb kasta oo ka mid ah markasta oo ay aaminsan yihiin in joojinta isticmaalkaasi lagamamaarmaan yahay:-
- (a) iyadoo looga dan leeyahay kala socodsiinta saxmadda baabuurta ama horumarinta badqabkooda;
- (b) ujeedada fududayn hawl dhisme, warshadeed, dumin ama qoditaan ka socota goobta baarkinka baska ama meelaha ku dheggan;
- (c) ujeedada dayactirka, horumarinta ama dib u dhiska goobta baarkinka baska;
- (d) ujeedada dhigista, taagista, wax ka badalista ama dayactir ka dhex socda ama laga wado dhulka ku xiga goobta baarkinka baska kuwaas oo lagu wado bullaacadaha ama xadhkaha, tuubooyinka ama qalabka loogu talagalay bixinta gaasta, biyaha ama koronta ama qalabyada elektaroonika ah ee loogu talagalay isgaarsiinta;
- (e) ujeedada dayactirka, rakibista ama saarista calaamad waddo, dhisme ama qalab dariiq oo ku dheggan goobta baarkinka basaska;

- (f) si dadka deggan dhismayaasha ku hareeraysan goobta baarkinka basaska markasta loogu fududeeyo hawlaha saarista alaabada guriga ama wixii la halmaala ee la gelinayo ama laga soo saarayo dhismayaasha ku hareeraysan goobta baarkinka basaska;
  - (g) xilli kasta oo sabab saxmad abuuraysa darteed ay macquul tahay in jidku xirmo ama xannibmo; ama
  - (h) si dadka deggan dhismayaasha ku hareeraysan goobta baarkinka basaska loogu fududeeyo xilliyada ay jiraan aroosyada ama tacsida, ama munaasabad kale oo khaas ah.
- (2) Askari booliis ah oo ku labbisan dirays ama sarkaalka taageerada bulshada ayaa si ku meel gaadh ah u joojin kara isticmaalka goobta baarkinka basaska, ama qayb ka mid ah, illaa 7 maalmood haddii ay aaminsan yihiin inay lagama maarmaan tahay in lagaga hortago ama lagu fududeeyo saxmada waddooyinka, ciriiriga, ama khataraha la xidhiidha gaadiidka duruufo aan caadi ahayn awgood.
- (3) Qof kasta oo hakinaya ama amraya in la joojiyo isticmaalka goobta baarkinka basaska si waafaqsan shuruucda ku xusan farqadaha (1) ama (2) ee Qodobkani waa inuu isla markaas goobta baarkinka basaska sudhaa ama arma in la dhigo calaamad waddo muujinaysa in isticmaalka goobtan baaarkin basaska la joojiyay ama calaamad waddo muujinaysa in istaagista baabuurta ee goobtan baarkinka basaska la mamnuucay.

(4) Ka-dhaafitaanka inta lagu jiro hakinta goobaha baarkinka basaska

Qofna looma ogola inuu gaadhi kaga tago ama amro in lagaga tago goob baarkin bas muddada goobtaas ay taallo ama ku dhinac dheggan tahay calaamad waddo (muujinaysa in isticmaalka goobta baarkinka baska la hakiyay) oo loo dhigay si waafaqsan farqada (3) ee Qodobkan -

Haddii aanay jirin wax qodobkan ku jira oo sharci darro ka dhigaya in la istaajiyo ama loo ogolaado inuu istaago gaadhi loo isticmaalo:-

- (a) adeega dabdamiska iyo samatabixinta, ambalaasta ama hawlo booliis.
- (b) gaarigu wuu taagnanayaa haddii darawalka ay caqabada ka baxsan awoodiisu ka hor istaagto inuu dhaqaaqo ama uu isu taago si uu isaga ilaaliyo shil;
- (c) gaadhigu u taagnanayo muddo ku filan oo lagamamaarmaan u ah saaritaanka wax xannibaya isku-socodka baabuurta -

ama haddii gaadhiga goobta lagaga tago iyadoo ogolaansho laga haysto qofka isticmaalka goobta baarkinka baska u hakiyay si waafaqsan farqadda (1) ee Qodobkan, ama qof kale oo uu ogolaansho buuxa siiyay.

Beddelista Booska Gaari Ku Jira Goobaha Baarkinka Basaska

41. Haddii gaari uu istaago goobta baarkinka baska ka hor imanaysa Qodobka 32 ama Qodobka 39 ee amarkan sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya ayaa beddeli kara ama amri kara in la beddelo goobta gaarigu taagan yahay si loogu



hogaansamo shuruucda la soo xusay.

Kasaarida Baabuurta Goobaha Baarkinka Basaska iyo Si Badbaado Leh u Hayntooda

42. Haddii gaadhi (marka laga reebo mid aan dhaqaaqi karayn) looga tago goobta baarkinka baska si ku xadgudbaysa qodobada Qaybta III ee amarkan, sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya ayaa gaadhiga goobta ka qaadi kara ama soo agaasimi kara in laga qaado goobta baarkinka baska, oo haddii tani dhacdonaa waa inuu qaaditaankan u saameeyaa hab badbaado leh una hayaa gaadhiga si badqabta.

Qaababka Gaadhi Looga Saarayo Goobaha Baarkinka Basaska

43. Sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya kaas oo si waafaqsan Qodobka 42 amarkan gaadhi u saaraya wuxu gaadhiga u saari karaa isagoo jiidaya ama kaxaynaya, ama qaabkii kale ee uu ka qaadi waayay inay lagamamaarmaan tahay, oo wuxu awood u leeyahay inuu ficiladaas ku sameeyo gaadhiga si uu u sameeyo saarista la soo sheegay.

Dhaqdhaqaaqa Baabuurta ku jira Goobaha Baarkinka Basaska Xilliyada ay Jiraan Xaalado Degdeg ah

44. Qof kasta oo si guud ama si khaas ah oo ugu ogolaadeen Golaha, sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya wuxu gaadhi lagaga tegay goobta baarkinka basaska u dhaqaajin karaa ama amri karaa in loo dhaqaajiyo meesha uu u arko inay ku habboon tahay.

Dhigitaanka Calaamadaha Waddooyinka iwm.

45. Goluhu waa inuu:-
- (a) dhigaa oo ku ilaaliyaa agagaarka goobta baarkinka basaska calaamado waddo iyo ama summadaha kale ee dariiqyada oo yeelan kara cabbir, midab iyo nooc kasta oo ay dejisay Waaxda Gaadiidka taas oo muujinaysa in goobtan baarkinka basaska loo isticmaali karo in lagaga tago keliya baabuurta lagu cayimay Qodobka 28 ee amarka; iyo
  - (b) qabto hawlaha kale ee looga baahan yahay si hufan u adeegsiga goobaha baarkinka basaska.

**QAYBTA V**

**GOOBHA BAARKINKA DADKA NAAFADA AH**

Oggolaanshaha iyo Istimaaalka Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah

46. Aag kasta oo ka mid ah laamiga oo qorshayaashu ku calaamadiyeen **Dadka haysta aqoonsiga naafada oo qudha 8 subaxnimo - 6 galabnimo 3 saacadood laguma soo laaban karo ka hor 1 saacad** (haddii aan si kale loogu tilmaamin isla qorsheyaasha dhexdooda, hal dhinac uu ka soo celinayo gefinka laamiga) waxa hadda ka dib loo adeegsan doonaa goob dadka naafada ah baabuurta dhigtaan, iyadoo loo eegayo qodobadan soo socda ee amarkan.
47. Aag kasta oo ka mid ah laamiga oo qorshayaashu ku calaamadiyeen **Dadka haysta aqoonsiga naafada oo qudha Isniin- Jimce 9 subaxnimo - 5 galabnimo 2 saacadood laguma soo laaban karo**

**ka hor 4 saacadood** (haddii aan si kale loogu tilmaamin isla qorsheyaasha dhexdooda, hal dhinac uu ka soo celinayo gefinka laamiga) waxa hadda ka dib saacadaha u dhexeeyaa 9.00 subaxnimo iyo 5.00 galabnimo marka laga reebo Sabtida ama Axadda loo adeegsan doonaa goob dadka naafada ah baabuurta dhigtaan.

48. Darawalka wata gaadhi isticmaalaya aqoonsiga qof baarkinka baabuurta dadka naafada ah ee qorsheyaashu ku calaamadiyeen **Dadka haysta aqoonsiga naafada oo qudha 8 subaxnimo - 6 galabnimo 3 saacadood laguma soo laaban karo ka hor 1 saacad** waa inaanu gaadhiga u dayn ama cid kale u ogolaan inay taagnaato baarkinka dadka naafada wax ka badan muddada saddexda saacadood ah.
49. Darawal wata gaadhi isticmaalaya aqoonsiga qof baarkinka baabuurta dadka naafada ah ee qorsheyaashu ku calaamadiyeen **Dadka haysta aqoonsiga naafada oo qudha 8 subaxnimo - 6 galabnimo 3 saacadood laguma soo laaban karo ka hor 1 saacad** looma ogola inuu gaadhiga ku soo celiyo ama cid kale u ogolaado inay gaadhiga baarkinka dadka naafada ah ku soo celiso illaa inta muddo hal saacad ahi ka soo wareegayso xilligii gaadhiga baarkinka laga kaxeeyay..
50. Darawalka wata gaadhi isticmaalaya aqoonsiga qof baarkinka baabuurta dadka naafada ah ee qorsheyaashu ku calaamadiyeen **Dadka haysta aqoonsiga naafada oo qudha Isniin - Jimce 9 subaxnimo - 5 galabnimo 2 saacadood laguma soo laaban karo ka hor 4 saacad** waa inaanu gaadhiga u dayn ama cid kale u ogolaan inay taagnaato baarkinka dadka naafada wax ka badan muddada labada saacadood ah.
51. Darawal wata gaadhi isticmaalaya aqoonsiga qof baarkinka baabuurta dadka naafada ah ee qorsheyaashu ku calaamadiyeen **Dadka haysta aqoonsiga naafada oo qudha Isniin - Jimce 9 subaxnimo - 5 galabnimo 2 saacadood laguma soo laaban karo ka hor 4 saacad** looma ogola inuu gaadhiga ku soo celiyo ama cid kale u ogolaado inay gaadhiga baarkinka dadka naafada ah ku soo celiso illaa inta muddo afar saacadood ahi ka soo wareegayso xilligii gaadhiga baarkinka laga kaxeeyay.
52. Xadadka goob kasta oo baarkin dadka naafada ah oo laamiga ku taalla waa inay muujiyaan caalamadaha waddooyinka ee ku habboon.

#### Habka Istaagista Goobta Baarkinka Dadka Naafada ah

53. Darawalka wata gaadhiga qof naafada ah oo dhiganaya goobta baarkinka dadka naafada ah waa inuu isu taago:-
  - (a) haddii qodobbo gaar ah jiraan  
haddii gaadhiga qofka naafada la dhigayo goobta baarkinka dadka naafada ah oo leh qodob habjoogsi loogu talagalay baabuurta dadka naafada oo gaar ah oo lagu muujiyay calaamadaha waddada ku yaalla oo ku habboon, waa in gaadhigu goobtaas u taagnaado qaab waafaqsan shuruucdaas;
  - (b) haddii aanay jirin qodobbo gaar ah  
haddii aanay jirin wax qodob ah oo goobta baarkinka dadka naafada ah u gaar ah waa inuu u istaagaa waddada qaab saf keliya ah oo la siman gefinka laamiga iyadoo masaafada u dhexaysa dacalka laamiga iyo taayirka gaadhiga qofkan naafada ah ee xiga dhanka laamiga ee gaariga waxaan ka badnayn saddex boqol oo millimitir; iyo
  - (c) iyadoo qayb kasta oo ka mid ah gaadhiga qofka naafada ah ay ku guda jirayso xadadka

goobta baarkinka dadka naafaada ah.

Xadidaada Saaran Gaadhiga Icticmaalaya Goobta Baarkinka Dadka Naafada ah

54. Darawalka baabuurka qofka naafada ah ee isticmaalaya goobta baarkinka dadka naafada ah waa inuu damiyo mishiinka isla marka uu gaadhigu soo galo goobta baarkinka dadka naafada ah oo aanu daarin mishiinka illaa isaga oo gaadhiga booska baarkinka dadka naafada ah ka beddelaya, ama ka tegaya goobta rarista maahane.
55. Darawalka gaadhiga qofka naafada ah ee taagan goobta baarkinka dadka naafada ah waa in aanu yeedhin hoon ama wax la mid ah marka laga yimaado isaga oo gaadhiga baarkinka ka beddelaya, ama ka tegaya baarkinka dadka naafada ah maahane.
56. Qofna looma ogola inuu iibiyo ama isku dayo inuu beeciyo wax badeeco ah isagoo ku jira gaadhi qof naafo ah oo ku baakiman goobta baarkinka dadka naafada ah isagoo ka iibinaya qof jooga ama u dhow goobta baarkinka dadka naafada ah ama inuu iibiyo ama soo bandhigo adeegyo ama xirfado uu damacsana yahay inuu gado ama iib u soo bandhigo.
57. Qofna looma ogola inuu gaadhi qof naafo ah oo ku baakiman goobta baarkinka dadka naafada ah ka qabto wax shaqo dayactir ah ama hagaajin ah ama inuu dhaqo gaadhiga qofka naafada ah marka laga reebo hawlaha dayactirka ee loo baahan yahay si gaadhiga looga dhaqaajiyo goobta baarkin dadka naafada ah.

Xadidaada Saaran Gaadhiga Yaalla Goobta Baarkinka Dadka Naafada ah

58. Marka laga reebo sida ku xusan qodobka 59-aad ee amarkan, qofna waa inuusan ka tagin gaadhi taagan goobta baarkinka dadka naafada ah:-
  - (a) illaa isagoo gaadhigaas ah nooca lagu xusay Qodobka 46aad ama Qodobka 47aad ee amarkan; iyo
  - (b) isagoo taagan boos aan ahay ka lagu cayimay Qodob 53aad ee amarkan.

Xaddidaada Baabuurta Dhiganaya Baarkinka Dadka Naafada ah ee aan Ahayn Gaadhi Qof Naafo ah

59. (1) Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobada hore ee amarkan ee ku saabsan gaadhi lagaga tago goobta baarkinka dadka naafada ah isagoo waafaqsan shuruucdaas, gaari kasta oo kale oo aan ahayn gaadhi qof naafo ah wuxu istaagi karaa meel kasta oo ka mid ah laamiga oo ku guda jirta goobta baarkinka dadka naafada ah (aan ka ahayn goobaha ama qaybaha baarkinka basaska ee isticmaalkooda la joojiyay) haddii:-
  - (a) gaadhigu wuxu taagnaanaya muddada lagama maarmaanka u ah in qofku soo fuulo ama ka dego gaariga;
  - (b) gaarigu wuxu taagnaanayaa haddii darawalka ay caqabada ka baxsan awoodiisu ka hor istaagto inuu dhaqaaqo ama uu isu taago si uu isaga ilaaliyo shil;
  - (c) gaariga loo isticmaalayo adeeg dabdamis ama samatabbixineed, ambalaas ama hawlo boolis ama uu yahay gaari (aan ahay gaari rakaab) ay isticmaalayaan shaqaalaha dowladda hoose oo gudanaya waajibaadkooda sharciyeed;

- (d) gaadhigu u taagnaayo muddada ku filan oo lagamamaarmaan u ah saaritaanka wax xannibaya isku-socodka baabuurta;
- (e) uu yahay gaadhi ay adeegsanayaan shaqaalaha boostada dadwaynaha oo ku jira shaqadooda adeega boosta ee ay ku geynayaan ama kaga soo uruurinayaa baqshadaha boostada goobaha ku dheggaan goobta baarkinka dadka naafada ah ama inay baqshadaha geeyaan ama ka soo qaadaan sanduuqyada boostada ee ku dheggaan goobta baarkinka dadka naafada ah; ama
- (f) gaadhigu u taagan yahay muddo macquul ah oo lagama maarmaan u ah in dayactirka, rakibista ama saarista calaamad waddo, ama qalab dariiq oo ku dheggaan goobta baarkin dadka naafada ah.

(2) Xeerarka kor lagu sheegay waa inaan loo fasirran inay fasaxayaan wax ku xad-gudbaya xeerarka lagu sheegay ama ka sii dhalanaya Qaybta 25 ee Xeerka 1984.

#### Hab Joogsiga Baabuurta Laga Dhaafay Xannibaadda Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah

60. Qof gaadhi istaajinaya ama u ogolaanaya inuu qof kale sugitaan ku sameeyo goobta baarkinka dadka naafada ah si waafaqsan shuruucda ku xusan farqad-hoosaadka (e) iyo (f) ee farqadda (1) ee Qodobka la soo dhaafay waa inuu hubiyaa:-

- (a) haddii gaadhi qof naafada ah yaallo goobta baarkinka dadka naafada ah oo leh qodobo habjoogsi baabuur oo gaar ah oo lagu muujiyay calaamadaha waddada ku yaalla oo ku habboon, waa in gaadhigu goobtaas u taagnaado qaab waafaqsan habka baabuurta halkaas isu taagaan;
  - (i) illaa iyadoo dhererka gaadhigu ogolaan waayo inuu u hogaansamo farqad hoosaadkan maahane, waa in gaadhiga isu taago si waafaqsan shuruucda la soo xusay iyadoo qayb kasta oo gaadhiga ka mid ah ku guda jirayso goobta baarkinka dadka naafada ah; ama
  - (ii) haddii dhererka gaadhigu uu ogolaan waayo u hogaansanka farqad-hoosaadka hore, waa in dhererka caqaayadda gaariga la sinaado dacalka laamiga iyo in masaafada u dhexeysa dacalka laamiga iyo taayirka ugu xiga dhanka laamiga aanay ka badnaan saddex boqol oo millimitir; iyo
- (b) haddii goobtu tahay goob kasta oo kale oo dadka naafada ahi baabuurta dhigtaan, waa in dhererka caqaayadda gaariga la sinaado dacalka laamiga iyo in masaafada u dhexeysa dacalka laamiga iyo taayirka ugu xiga dhanka laamiga aanay ka badnaan saddex boqol oo millimitir.

#### Awoodda Lagu Hakinayo Isticmaalka Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah

61. (1) Qof kasta oo Goluhu si guud ama si khaas ah ugu ogolaaday inay isticmaalaan goob rariseed waxay awood u leeyihiin inay joojiyaan isticmaalka goob kasta oo dadka naafada ahi baabuurta dhigtaan, ama qayb kasta oo ka mid ah markasta oo ay aaminsan yihiin in joojinta isticmaalkaasi lagamamaarmaan yahay:-

- (a) iyadoo looga dan leeyahay kala socodsiinta saxmadda baabuurta ama horumarinta badqabkooda;
  - (b) ujeedada fududayn hawl dhisme, warshadeed, dumin ama qoditaan ka socota goobta baarkinka dadka naafada ah ama meelaha ku dheggan;
  - (c) ujeedada dayactirka, horumarinta ama dib u dhiska goobta baarkinka dadka naafada ah;
  - (d) ujeedada dhigista, taagista, wax ka badalista ama dayactir ka dhex socda ama laga wado dhulka ku xiga goobta baarkinka dadka naafada ah kuwaas oo lagu wado bullaacadaha ama xadhkaha, tuubooyinka ama qalabka loogu talagalay bixinta gaasta, biyaha ama koronta ama qalabyada elektaroonika ah ee loogu talagalay isgaarsiinta;
  - (e) ujeedada dayactirka, rakibista ama saarista calaamad waddo, dhisme ama qalab dariiq oo ku dheggan goobta baarkinka dadka naafada ah;
  - (f) si dadka deggan dhismayaasha ku hareeraysan goobta baarkinka dadka naafada ah markasta loogu fududeeyo hawlaha saarista alaabada guriga ama wixii la halmaala ee la gelinayo ama laga soo saarayo dhismayaasha ku hareeraysan goobta baarkinka dadka naafada ah;
  - (g) xilli kasta oo sabab saxmad abuuraysa darteed ay macquul tahay in jidku xirmo ama xannibmo; ama
  - (h) si dadka deggan dhismayaasha ku hareeraysan goobta baarkinka dadka naafada ah loogu fududeeyo xilliyada ay jiraan aroosyada ama tacsida, ama munaasabad kale oo khaas ah.
- (2) Askari booliis ah oo ku labbisan dirays ama sarkaalka taageerada bulshada ayaa si ku meel gaadh ah u joojin kara isticmaalka goobta baarkinka dadka naafada ah, ama qayb ka mid ah, illaa 7 maalmood haddii ay aaminsan yihiin inay lagama maarmaan tahay in lagaga hortago ama lagu fududeeyo saxmadda waddooyinka, ciriiriga, ama khataraha la xidhiidha gaadiidka duruufo aan caadi ahayn awgood.
- (3) Qof kasta oo hakinaya ama amraya in la joojiyo isticmaalka goobta baarkinka dadka naafada ah si waafaqsan shuruucda ku xusan farqadaha (1) ama (2) ee Qodobkani waa inuu isla markaas goobta baarkinka basaska sudhaa ama arma in la dhigo calaamad waddo muujinaysa in isticmaalka goobtan baaarkin dadka naafada ah la joojiyay ama calaamad waddo muujinaysa in istaagista baabuurta ee goobtan baarkinka basaska la mamnuucay.
- (4) Ka-dhaafitaanka inta lagu jiro hakinta goobaha baarkinka dadka naafada ah
- Qofna looma ogola inuu gaadhi kaga tago ama amro in lagaga tago goob dadka naafada ah baabuurta dhigtaan muddada goobtaas ay taallo ama ku dhinac dheggan tahay calaamad waddo (muujinaysa in isticmaalka goobta baarkinka dadka naafada ah la hakiyay) oo loo dhigay si waafaqsan farqada (3) ee Qodobkan -

Haddii aanay jirin wax qodobkan ku jira oo sharci darro ka dhigaya in la istaajiyo ama

loo ogolaado inuu istaago gaadhi loo isticmaalo:-

- (a) adeega dabdamiska iyo samatabixinta, ambalaasta ama hawlo booliis.
- (b) gaarigu wuu taagnaanayaa haddii darawalka ay caqabada ka baxsan awoodiisu ka hor istaagto inuu dhaqaaqo ama uu isu taago si uu isaga ilaaliyo shil; ama
- (c) gaadhigu u taagnaanayo muddo ku filan oo lagamamaarmaan u ah saaritaanka wax xannibaya isku-socodka baabuurta -

ama haddii gaadhiga goobta lagaga tago iyadoo ogolaansho laga haysto qofka isticmaalka goobta baarkinka dadka naafada ah u hakiyay si waafaqsan farqadda (1) ee Qodobkan, ama qof kale oo uu ogolaansho buuxa siiyay.

#### Beddelista Booska Gaari Ku Jira Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah

62. Haddii gaari uu istaago goobta baarkinka dadka naafada ah ka hor imanaysa Qodobka 53 ama Qodobka 60 ee amarkan sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya ayaa beddeli kara ama amri kara in la beddelo goobta gaarigu taagan yahay si loogu hogaansamo shuruucda la soo xusay.

#### Kasaarida Baabuurta Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah iyo Si Badbaado Leh u Hayntooda

63. Haddii gaadhi (marka laga reebo mid aan dhaqaaqi karayn) looga tago goobta baarkinka dadka naafada ah si ku xadgudbaysa qodobada Qaybta III ee amarkan, sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya ayaa gaadhiga goobta ka qaadi kara ama soo agaasimi kara in laga qaado goobta baarkinka dadka naafada ah, oo haddii tani dhacdonna waa inuu qaaditaankan u saameeyaa hab badbaado leh una hayaa gaadhiga si badqabta.

#### Qaababka Gaadhi Looga Saarayo Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah

64. Askari fulinta madaniga ah, askariga bilayska ah ee ku lebisn dareeska ama askariga bulshada kaalmeeya oo kaxeeya gaadhi sida ku cad qodobka 63 ee amarkan waxa uu ku samayn karaa jiidid ama kaxaynta, ama si kale oo uu u arko in loo baahan yahay. Qaado tillaabooyinka noocaan oo kale ah ee la xiriira gaarigaas iyadoo loo maleynayo inay lagama maarmaan tahay si loo suurtageliyo qaadista sida kor ku xusan.

#### Dhaqdhaqaaqa Baabuurta ku jira Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah Xilliyada ay Jiraan Xaalado Degdeg ah

65. Qof kasta oo si guud ama si khaas ah oo ugu ogolaadeen Golaha, sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya wuxu gaadhi lagaga tegay goobta baarkinka dadka naafada ah u dhaqaajin karaa ama amri karaa in loo dhaqaajiyo meesha uu u arko inay ku habboon tahay.

#### Dhigitaanka Calaamadaha Waddooyinka iwm.

66. Goluhu waa inuu:-
  - (a) dhigaa oo ku ilaaliyaa agagaarka goobta baarkinka dadka naafada ah calaamado waddo iyo ama summadaha kale ee dariiqyada oo yeelan kara cabbir, midab iyo nooc kasta oo

ay dejisay Waaxda Gaadiidka taas oo muujinaysa in goobtan baarkinka dadka naafada ah loo isticmaali karo in lagaga tago keliya baabuurta lagu cayimay Qodobka 46 iyo Qodobka 47 ee amarka; iyo

- (b) qabto hawlaha kale ee looga baahan yahay si hufan u adeegsiga goobaha baarkinka dadka naafada ah.

## **QAYBTA VI**

### **GOOBAHA BAARKINKA BAABUURTA NAADIGA**

#### **Astaynta iyo Isticmaalka Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiga**

67. Aag kasta oo ka mid ah laamiga oo qorshayaashu ku calaamadiyeen **Ciddii haysta rukhsadda baabuurta naadiga oo qudha** (haddii aan si kale loogu tilmaamin isla qorsheyaasha dhexdooda, hal dhinac uu ka soo celinayo geftinka laamiga) waxa hadda ka dib loo adeegsan doonaa goob baarkin la dhigo Baabuurta Naadiga.

#### **Lambarka iyo Xaaladda Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiga**

68. Tirada iyo xaaladda goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiga waxay noqonayaan sida Golahu u go'aamiyo.
69. Xadadka goob kasta oo Baabuurta Naadiga la dhigo oo laamiga ku taalla waa inay muujiyaan caalamadaha waddooyinka ee ku habboon.

#### **Habka Istaagista Goobta Baarkinka Baabuurta Naadiyada**

70. Darawalka gaadhiga istaagaya goob la dhigo Baabuurta Naadiyada waa inuu u istaago:-

- (a) haddii qodobbo gaar ah jiraan

haddii Gaadhi Naadi yaallo goob Baabuurta Naadiyada la dhigto oo leh qodobo habjoogsi bas oo gaar ah oo lagu muujiyay calaamadaha waddada ku yaalla oo ku habboon, waa in gaadhigu goobtaas u taagnaado qaab waafaqsan shuruucdaas;

- (b) haddii aanay jirin qodobbo gaar ah

waddada qaab saf keliya ah oo la siman geftinka laamiga iyadoo masaafada u dhexaysa dacalka laamiga iyo taayirka xiga dhanka laamiga ee gaariga waxaan ka badnayn saddex boqol oo millimitir; iyo

qaab qayb kasta oo ka mid ah gaadhiga guud ahaan uu ku gudo jiro hal goob Baakin Naadiyeed keliya.

#### **Xadidaadaha Isticmaalka ee Baabuurta Taagan Goobta Baarkinka Naadiyada**

71. Darawalka baabuurka isticmaalaya goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada waa inuu damiyo mishiinka isla marka uu gaadhigu soo galo goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada oo aanu darin mishiinka illaa isaga oo gaadhiga booska baarkina Baabuurta Naadiyada ka beddelaya, ama ka tegaya goobta rarista maahane.

72. Darawalka gaadhiga taagan goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada waa in aanu yeedhin hoon ama wax la mid ah marka laga yimaado isaga oo gaariga baarkinka ka beddelaya, ama ka tegaya baarkinka Baabuurta Naadiyada maahane.
73. Qofna looma ogola inuu iibiyo ama isku dayo inuu beeciyo wax badeeco ah isagoo ku jira gaadhi ku baakiman goob Baabuurta Naadiyada la dhigto isagoo ka iibinaya qof jooga ama u dhow goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada ama inuu iibiyo ama soo bandhigo adeegyo ama xirfado uu damacsana yahay inuu gato ama iib u soo bandhigo.
74. Qofna looma ogola inuu gaadhi ku baakiman goob Baabuurta Naadiyada la dhigto ka qabto wax shaqo dayactir ah ama hagaajin ah ama inuu dhaqo gaadhiga marka laga reebo hawlaha dayactirka ee loo baahan yahay si gaadhiga looga dhaqaajiyo goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada.

Xaddidaadaha Wax Ku Sugista Goobta Baarkinka Baabuurta Naadiyada

75. Marka laga reebo sida ku xusan qodobka 76-aad ee amarkan, qofna waa inuusan ka tagin gaadhi taagan goob baarkin Baabuurta Naadiyada:-
- (a) isagoo gaadhi ah Baabuur Naadiyeed; iyo
- (b) isagoo taagan boos aan ahay ka lagu cayimay Qodob 70aad ee amarkan.

Xannibaadaha in Baabuur aan ahayn Bas ay ku Istaagaan Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada

76. (1) Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobada hore ee amarkan ee ku saabsan bas lagaga tago goob baarkin baabuur naadiyeed isagoo waafaqsan shuruucdaas, gaari kasta oo kale oo aan ahayn bas wuxu istaagi karaa meel kasta oo ka mid ah laamiga oo ku guda jirta goob baarkin baabuur naadiyeed (aan ka ahayn goobaha ama qaybaha baarkinka Baabuurta Naadiyada ee isticmaalkooda la joojiyay) haddii:-
- (a) gaadhigu wuxu taagnanaya muddada lagama maarmaanka u ah in qofku soo fuulo ama ka dego gaariga;
- (b) gaarigu wuxu taagnanayaa haddii darawalka ay caqabada ka baxsan awoodiisu ka hor istaagto inuu dhaqaaqo ama uu isu taago si uu isaga ilaaliyo shil;
- (c) gaariga loo isticmaalayo adeeg dabdamis ama samatabbixineed, ambalaas ama hawlo boolis ama uu yahay gaari (aan ahay gaari rakaab) ay isticmaalayaan shaqaalaha dowladda hoose oo gudanaya waajibaadkooda sharciyeed;
- (d) gaadhigu u taagnanayo muddada ku filan oo lagamamaarmaan u ah saaritaanka wax xannibaya isku-socodka baabuurta;
- (e) uu yahay gaadhi ay adeegsanayaan shaqaalaha boostada dadwaynaha oo ku jira shaqadooda adeega boosta ee ay ku geynayaan ama kaga soo uruurinayaa baqshadaha boostada goobaha ku dheggan goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada ama inay baqshadaha geeyaan ama ka soo qaadaan sanduuqyada boostada ee ku dheggan goob Baabuurta Naadiyada la dhigto; ama
- (f) gaadhigu u taagan yahay muddo macquul ah oo lagama maarmaan u ah in



dayactirka, rakibista ama saarista calaamad waddo, dhisme ama qalab dariiq oo ku dheggaan goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada.

- (2) Xeerarka kor lagu sheegay waa inaan loo fasirran inay fasaxayaan wax ku xad-gudbaya xeerarka lagu sheegay ama ka sii dhalanaya qaybta 25 ee Xeerka 1984.

#### Hab Joogsiga Baabuurta Laga Dhaafay Xannibaadda Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada

77. Qof bas istaajinaya ama u ogolaanaya inuu qof kale sugitaan ku sameeyo goob baarkin Baabuur Naadiyeed si waafaqsan shuruucda ku xusan farqad-hoosaadka (e) ama (f) ee Qodobka la soo dhaafay waa inuu hubiyaa:-

- (a) haddii bas yaallo goob baarkin Baabuur Naadiyeed oo leh qodobo habjoogsi baabuur oo gaar ah oo lagu muujiyay calaamadaha waddada ku yaalla oo ku habboon, waa in gaadhigu goobtaas u taagnaado qaab waafaqsan habka baabuurta halkaas isu taagaan;
- (i) illaa iyadoo dhererka gaadhigu ogolaan waayo inuu u hogaansamo farqad hoosaadkan maahane, waa in gaadhiga isu taago si waafaqsan shuruucda la soo xusay iyadoo qayb kasta oo gaadhiga ka mid ah ku guda jirayso goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada; ama
- (ii) haddii dhererka gaadhigu uu ogolaan waayo u hogaansanka farqad-hoosaadka hore, waa in dhererka caqaayadda gaarigu la sinaado dacalka laamiga iyo in masaafada u dhexeysa dacalka laamiga iyo taayirka ugu xiga dhanka laamiga aanay ka badnaan saddex boqol oo millimitir; iyo
- (b) haddii gaadhigu joogo goob Baabuurta Naadiyada dhigtaan waa in qayb kasta oo gaadhiga ka mid ah ku jirto goobta baarkinka oo dhererka caqaayadda gaarigu la sinaado dacalka laamiga iyo in masaafada u dhexeysa dacalka laamiga iyo taayirka ugu xiga dhanka laamiga aanay ka badnaan saddex boqol oo millimitir; iyo

#### Awoodaha Lagu Hakinayo Isticmaalka Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada

78. (1) Qof kasta oo Goluhu si guud ama si khaas ah ugu ogolaaday inay isticmaalaan goob rariseed waxay awood u leeyihiin inay joojiyaan

isticmaalka goob kasta oo baarkin baabuurta naadiyada, ama qayb kasta oo ka mid ah markasta oo ay aaminsan yihiin in joojinta isticmaalkaasi lagamamaarmaan yahay:-

- (a) iyadoo looga dan leeyahay kala socodsiinta saxmadda baabuurta ama horumarinta badqabkooda;
- (b) ujeedada fududayn hawl dhisme, warshadeed, dumin ama qoditaan ka socota goobta baarkinka baabuurta naadiyada ama meelaha ku dheggaan;
- (c) ujeedada dayactirka, horumarinta ama dib u dhiska goobta baarkinka baabuurta naadiyada;
- (d) ujeedada dhigista, taagista, wax ka badalista ama dayactir ka dhex socda ama laga wado dhulka ku xiga goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada kuwaas oo lagu wado bullaacadaha ama xadhkaha, tuubooyinka ama qalabka loogu talagalay bixinta gaasta, biyaha ama koronta ama qalabyada elektaroonika ah ee

loogu talagalay isgaarsiinta;

- (e) ujeedada dayactirka, rakibista ama saarista calaamad waddo, dhisme ama qalab dariiq oo ku dheggan goobta Baabuurta Naadiyada;
  - (f) si dadka deggan dhismayaasha ku hareeraysan goobta baarkinka basaska markasta loogu fududeeyo hawlaha saarista alaabada guriga ama wixii la halmaala ee la gelinayo ama laga soo saarayo dhismayaasha ku hareeraysan goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada;
  - (g) xilli kasta oo sabab saxmad abuuraysa darteed ay macquul tahay in jidku xirmo ama xannibmo; ama
  - (h) si dadka deggan dhismayaasha ku hareeraysan goobta Baabuurta Naadiyada loogu fududeeyo xilliyada ay jiraan aroosyada ama tacsida, ama munaasabad kale oo khaas ah.
- (2) Askari booliis ah oo ku labbisan dirays ama sarkaalka taageerada bulshada ayaa si ku meel gaadh ah u joojin kara isticmaalka goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada, ama qayb ka mid ah, illaa 7 maalmood haddii ay aaminsan yihiin inay lagama maarmaan tahay in lagaga hortago ama lagu fududeeyo saxmada waddooyinka, ciriiriga, ama khataraha la xidhiidha gaadiidka duruufo aan caadi ahayn awgood.
- (3) Qof kasta oo hakinaya ama amraya in la joojiyo isticmaalka goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada si waafaqsan shuruucda ku xusan farqadaha (1) ama (2) ee Qodobkani waa inuu isla markaas goobta baarkinka basaska sudhaa ama arma in la dhigo calaamad waddo muujinaysa in isticmaalka goobtan baaarkin basaska la joojiyay ama calaamad waddo muujinaysa in istaagista baabuurta ee goobtan baarkinka basaska la mamnuucay.
- (4) Ka-dhaafitaanka inta lagu jiro hakinta goobaha baarkinka Baabuurta Naadiyada

Qofna looma ogola inuu gaadhi kaga tago ama amro in lagaga tago goob baarkin Baabuurta Naadiyada muddada goobtaas ay taallo ama ku dhinac dheggan tahay calaamad waddo (muujinaysa in isticmaalka goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada la hakiyay) oo loo dhigay si waafaqsan farqada (3) ee Qodobkan -

Haddii aanay jirin wax qodobkan ku jira oo sharci darro ka dhigaya in la istaajiyo ama loo ogolaado inuu istaago gaadhi loo isticmaalo:-

- (a) adeega dabdamiska iyo samatabixinta, ambalaasta ama hawlo booliis.
- (b) gaarigu wuxu taagnaanayaa haddii darawalka ay caqabada ka baxsan awoodiisu ka hor istaagto inuu dhaqaaqo ama uu isu taago si uu isaga ilaaliyo shil;
- (c) gaadhigu u taagnanayo muddada ku filan oo lagamamaarmaan u ah saaritaanka wax xannibaya isku-socodka baabuurta -

ama haddii gaadhiga goobta lagaga tago iyadoo ogolaansho laga haysto qofka isticmaalka goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada u hakiyay si waafaqsan farqadda (1) ee Qodobkan, ama qof kale oo uu ogolaansho buuxa siiyay.

Beddelista Booska Gaari Ku Jira Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada

79. Haddii gaari uu istaago goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada ka hor imanaysa Qodobka 70 ama Qodobka 77 ee amarkan sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya ayaa beddeli kara ama amri kara in la beddelo goobta gaarigu taagan yahay si loogu hogaansamo shuruucda la soo xusay.

Kasaarida Baabuurta Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada iyo Si Badbaado Leh u Hayntooda

80. Haddii gaadhi (marka laga reebo mid aan dhaqaaqi karayn) looga tago goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada si ku xadgudbaysa qodobada Qaybta III ee amarkan, sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya ayaa gaadhiga goobta ka qaadi kara ama soo agaasimi kara in laga qaado goobta baarkinka Baabuurta Naadiya, oo haddii tani dhacdonna waa inuu qaaditaankan u saameeyaa hab badbaado leh una hayaa gaadhiga si badqabta.

Qaababka Gaadhi Looga Saarayo Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada

81. Qof kasta oo saara ama booska ka beddela gaadhi sida ku cad qodobka 79 ama Qodobka 80 ee amarkan waxa uu ku samayn karaa jiidid ama kaxaynta, ama si kale oo uu u arko in loo baahan yahay. Qaado tillaabooyinka noocaan oo kale ah ee la xiriira gaarigaas iyadoo loo maleynayo inay lagama maarmaan tahay si loo suurtageliyo qaadista sida kor ku xusan.

Dhaqdhaqaaqa Baabuurta ku jira Goobaha Baabuurta Naadiyada La Dhigo Xilliyada ay Jiraan Xaalado Degdeg ah

82. Qof kasta oo si guud ama si khaas ah oo ugu ogolaadeen Golaha, sarkaal fulineed madani ah, booliis dirays ku labbisan ama sarkaal bulsheed booliska kaabaya wuxu gaadhi lagaga tegay goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada u dhaqaajin karaa ama amri karaa in loo dhaqaajiyo meesha uu u arko inay ku habboon tahay.

Dhigista Calaadaha Waddooyinka iwm

83. Goluhu waa inuu:-
- (a) dhigaa oo ku ilaaliyaa agagaarka goobta baarkinka Baabuurta Naadiyada calaamado waddo iyo ama summadaha kale ee dariiqyada oo yeelan kara cabbir, midab iyo nooc kasta oo ay dejisay Waaxda Gaadiidka taas oo muujinaysa in goobtan baarkinka dadka naafada ah loo isticmaali karo in lagaga tago keliya baabuurta lagu cayimay Qodobka 67 ee amarkan; iyo
  - (b) qabto hawlaha kale ee looga baahan yahay si hufan u adeegsiga goobaha baarkinka Baabuurta Naadiyada.

**QAYBTA VII**

**BEDDELAADDA IYO LA LAABASHADA AMARADA**

84. Golaha Deegaanka ee Avon (Wadooyin kala duwan, Aagga Newtown, Magaalada Bristol) (Aagga Bartamaha Bari) (Laamiga Wayn ee 24ka Saacba La Maro) (Sharciga Guud ee Gaadiidka) Amarka 1995 sida ay u wax uga beddeleen Golaha Magaalada Bristol (Wadooyin

kala duwan, Aaga Queen Ann Road, Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagaga Bari iyo Bariga Bartamaha) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2011, Golaha Magaalada ee Bristol (Aagga Easton iyo St. Philips, Ashley iyo Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Bariga Dhexe iyo Aagaga Waqooyi ee Bartamaha) (Goobaha Baarkinka Dadka Deegaanka) (Mamnuucida Istaagista) Amarka 2014 iyo Golaha Magaalada Bristol ( Wadooyin kala duwan, Aagga St. Philips, Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagga Bartamaha Bari) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) Amarka 2014 waxa lagu sameeyay isbeddel dheeraad waana inuu yeesho saamayn la mid ah sida:-

(a) Jadwalka 2, qodobada khuseeya waddooyinka **BARROW ROAD, CHANCERY STREET, DAYS ROAD** iyo **LINCOLN STREET** waa laga saaray; oo

(b) Jadwalka 3, qodobada la xiriira waddada **LINCOLN STREET** waa laga saaray.

85. Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, A420 Church Road Area, Easton, Lawrence Hill, St. George East iyo St. George West, Magaalada Bristol) (Aaga Bari-Bartamaha iyo Bari) (Xeerka Gaadiidka Guud) Amarka 2007, nooca ay wax ka baddaleen Golaha Magaalada Bristol (Wadooyin kala duwan, Aagga West Street A420, Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagga Bartamaha Bari) (Goobaha Wax Lagu Rarto) (Goobaha Baaskiisha la Dhigoto) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) Amarka 2007, Golaha Magaalada ee Bristol (Kennard Road iyo Kingsway Crescent, St. George East, Magaalada Bristol) (Aagga Bari) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2008, Golaha Magaalada Bristol (Wadooyinka River Street iyo Wadooyinka Aan La Magacaabin ee ka baxsan Aagga St. Matthias Park, Lawrence Hill , Magaalada Bristol) (Gudaha, Waqooyiga Bartamaha iyo Aagaga Dibadda) (Mamnuucidda Sugitaanka - Aagga xaddidan) Amarka 2009, Golaha Magaalada ee Bristol (Aagga dibadda, Magaalada Bristol) (Gaadhi Dhigasho Xakamaysan) (Ka duwanaanshaha No. 3 - Kordhinta) Amarka 2009, Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, Magaalada oo dhan, Magaalada Bristol) (Mamnuucida Joogsashada Dugsiga Dibadiisa) Amarka 2009 (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2009, Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, A420 Church Road Area, Easton, Lawrence Hill, St. George East iyo St. George West, Magaalada Bristol) (Aaga Bari-Bartamaha iyo Bari) (Xeerka Gaadiidka Guud) (No. 1 - Air Balloon Road) Amarka 2011, Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan , A432 Fishponds Road iyo A432 Stapleton Road Area, Easton, Eastville, Frome Vale iyo Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagaga Bari iyo Bariga Bartamaha) (Sharciiga Gaadiidka Guud) Amarka 2011, Golaha Magaalada ee Bristol (Pilemarsh iyo Terrell Gardens, St. George West, Magaalada Bristol) (Aagga Bari) (Baabuur Haldhinac u socota iyo Baaskiilada oo ka hortagay ) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2012, Golaha Magaalada ee Bristol (Baabuurta La wadaago, Magaalada oo dhan, Magaalada Bristol) (Goobaha Baarkinka Waddada Korkeeda) Amarka 2012, Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, Aagga Kingsway, St. George East iyo St. George West, Magaalada Bristol) (Aaga Bari) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Mamnuucida Joogsashada) (Goobaha Baabuur Rarista) Amarka 2012, Golaha Magaalada Bristol (Wadooyin kala duwan, Clouds Hill Road iyo Plummers Hill Area, St. George West, City of Bristol) (Aaga Bari) (Mamnuucida iyo Xakamaynta Sugitaanka) (Mamnuucida Joogsashada) (Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah) Amarka 2014, Golaha Magaalada ee Bristol (Aagga Easton iyo St. Philips, Ashley iyo Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagaga Bariga Bartamaha iyo Waqooyiga Bartamaha) (Dhulka Baarkinka Dadka Degaanka) (Mamnuucidda Joogsashada) Amarka 2014 , Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, Aagga Victoria Avenue, Easton iyo St. George West Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Goobta Baabuurta wax looga raro) Amarka 2014, Golaha Magaalada Bristol ( Wadooyin kala duwan, St. Aagga Philips, Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagga Bartamaha Bari) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) Amarka 2014, Magaalada Bristol (Wadooyin

kala duwan, Aagga Waddada Whitehall, Easton iyo St. George West Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Mamnuucida Joojinta) (Mamnuucida Gaadhi Ku Wadashada) Amarka 2015, Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, Redfield Aagga Waqooyi, Easton iyo St. George West Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xadidaada Sugitaanka) (Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada) Amarka 2016, Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, Aagga Croydon Street, Lawrence Hill Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) Amarka 2016, Golaha Magaalada Bristol ( Wadooyin kala duwan, Beaconsfield Road Area, St. George West Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2019, Golaha Magaalada ee Bristol (Waddooyin kala duwan, Aagga Easton, Easton, Eastville iyo Lawrence Hill Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Mamnuucida Istaagista) (Goobaha Baabuurta Rarka lagaga rogo) (Goobaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada) (Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah) Amarka 2019, Golaha Magaalada Bristol (Ducie Road iyo Morton Street, Lawrence Hill Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) Amarka 2019 iyo Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, A420 Church Road Area, Easton, Lawrence Hill, St. George East iyo St. George West, Magaalada Bristol) (Aagaga Bariga iyo Bariga Bartamaha) (Sharciga Guud ee Gaadiidka) (Nooca Lr. 2 - Grindell Road) Amarka 2022 waxa hadda ka dib lagu sameeyay isbeddel keenaya inuu yeesho saamayn dhaqangal u taalla sida:-

- (a) Jadwalka 3, qodobada la xidhiidha waddooyinka **BARNES STREET, BEAUFORT ROAD, BLACKSWARTH ROAD, COBDEN STREET, COSSHAM ROAD, DERBY STREET, DUCIE ROAD, FIRECLAY ROAD, GLEBE ROAD, GRINDELL ROAD, MORTON STREET, NETHAM ROAD, NORTHCOTE ROAD, PILEMARSH, RICHMOND ROAD, SALISBURY STREET, SARAH STREET, SENECA STREET, SHERBOURNE STREET, THE AVENUE, THOMAS STREET, DARIIQ AAN LA MAGACAABIN(KA IMANAYSA DHINACA QAYBTA BARI EE WADDADA NETHAM SOONA GELAYSA UNUGYADA WARSHADAHA)** iyo **HAADKA WICKET** waa laga saaray amarka;
- (b) Jadwalka 5, qodobada la xidhiidha waddooyinka **BLACKSWARTH ROAD, COSSHAM ROAD, DUCIE ROAD, EBENEZER STREET, NORTHCOTE ROAD, RICHMOND ROAD, SALISBURY STREET, SARAH STREET, SENECA STREET** and **SHERBOURNE STREET** waa laga saaray amarka; iyo
- (c) Jadwalka 14, qodobada la xidhiidha waddooyinka **BLACKSWARTH ROAD, COBDEN STREET, COSSHAM ROAD, DUCIE ROAD, GLEBE ROAD, MORTON STREET, NORTHCOTE ROAD, RICHMOND ROAD, SALISBURY STREET, SENECA STREET, SHERBOURNE STREET** iyo **THOMAS STREET** waa laga saaray amarka.

86. Golaha Magaalada ee Bristol (Naadiga Baabuurta, Magaalada oo dhan, Magaalada Bristol) (Baakinada Dariiq

ku Yaalla) Amarka 2019 sida ay u beddeleen Golaha Magaalada Bristol ( Wadooyin kala duwan, Aagga Wadooyinka Fishponds, Eastville, Frome Vale iyo Hillfields Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xakamaynta Sugitaanka) (Mamnuucida Istaagista) (Meelaha Baarkinka Dadka Naafada ah) (Goobaha Rarista) (Meelaha Baarkinka Baabuurta Naadiyada) (Goobaha Baarkinka Baska) Amarka 2021 waxa halkan loogu beddelay uuna ku dhaqan gelayaa in qodobka leh lambarka CC19 ee Jadwalka 1 ee la xidhiidha **SENECA STREET (St. George West)** iyo qodobka CC21 ee la xidhiidha **STUART STREET (Easton)** laga saaray.

87. Amarada lagu sheegay Jadwalka 2 ee amarkan halkan ayaa lagu buriyay.

88. Qodobbada amarkan waa kordhin iyo kaabis uun oo ma nasakhayaan qodob kasta oo lagu xusay shuruuc kale ama laga yaabo inay ku jiraan Xeerka 1984 ama sharci kale oo dhaqangalay.

Shaabadda Guud ee Golaha Degaanka Bristol ayaa lagu dhuftay maalinta ## ee ##### 202-

SHAABADDA GUUD ee  
GOLAHA DEEGAANKA BRISTOL  
ayaa lagu dhuftay amarkan  
iyadoo oo uu goob joog yahay:-

Agaasimaha Adeegyada Sharciga iyo Dimuqraadiyadda

**JADWALKA 1**

**Qorshayaasha**

**PWR.EBLN.00 E**

**PWR.EBLN.01 E**

**PWR.EBLN.02 E**

**PWR.EBLN.03 E**

---

**PWR.EBLN.04 E**

**JADWALKA 2**

**Amarada laga laabanayo**

1. Golaha Magaalada Bristol ( Wadooyin kala duwan, Aagga Queen Ann Road, Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aaga Bari iyo Bariga ee Bartamaha) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2011
2. Golaha Magaalada Bristol ( Wadooyin kala duwan, Aagga Wadada Avonvale, Easton iyo Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagga Bari) (Mamnuucida iyo Xaddidaada Sugitaanka) Amarka 2014
3. Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, Aagga Victoria Avenue, Easton iyo St. George West Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanada) (Goobta Rarista) (Goobta Baarkinka Basaska) (Goobta Baakinka Dadka Naafada ah) Amarka 2015

4. Golaha Magaalada ee Bristol ( Wadooyin kala duwan, Beaconsfield Road Area, St. George West Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2019
5. Golaha Magaalada ee Bristol (Ducie Road iyo Morton Street, Lawrence Hill Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xakamaynta Sugitaanka) Amarka 2019
6. Golaha Magaalada Bristol ( Wadooyin kala duwan, Crews Hole Road Area, St. George Troopers Hill Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2021